

HABRAACYADA DUGSI KA-JOOJINTA

MACLUUMAADKA LOOGU TALAGALAY WAALIDIINTA* KA DIB DUGSI KA-JOOJINTA ILMAHAAGA

Baroosharkan waa in la siiyaa qofka quseeya ardayga ayadoo ay la socoto Ogaysiinta Dusi Ka-joojinta.

Baroosharkan wuxuu siinayaa macluumaadka soo socda ee ar-dayga iyo qofkooda quseeya:

- Waxa la sameeyo haddii aad wax cabasho ah ka qabto oo ku saabsan dugsi ka-joojinta ilmahaaga
- Sida ay dugsiyadu u taageeri karaan ardayda ka dib dugsi ka-joojinta
- Halka laga helo wixii macluumaad dheeraad ah iyo taageero.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan habka dugsi ka joojinta, oo ay ka mid yihiin kaalimaha iyo masuuliyadaha, iyo waxaad ka fidi karto inay dhacaan ka-hor dugsi ka-joojinta, ka eeg www.education.vic.gov.au/school/parents/behaviour/Pages/faqs.aspx

ILMAHAYGU WAXAA LAGA JOOJIYEH DUGSIGA, MAXAY TAAS LA MACNO TAHAY?

Ka-joojintu waa tallaabo anshax oo ay ku jiraan si ku-meel-gaar ah uga joojin ardayga fasalka ama nashaadyada uu ogolaaday dugsi muddo waqti cayiman ah. Ilmahaaga waxaa loo ogolaan doonaa inuu ku soo noqdo fasalka ama nashaadyada uu ogolaaday dugsi ka dib muddadii loo qabtay eryidda.

MUXUU MAAMULUHU TIXGELIYEH KA HOR KA-JOOJINTA DUGSIGA?

Ka hor intaan ardayga laga joojin dugsi, waa in maamuluhu hubiyaa:

- In ardaygu helay fursadda in la dhagaysto
- Wixii macluumaad ama dokumanti ah oo uu keeno ardaygu ama qofkooda quseeya in la tixgeliyey marka la samaynayo go'aanka ka-joojinta
- Wixii tallaabooyin kale ah oo lagu eegayo dhaqanka ardayga looga joojiyey dugsi in la tixgeliyey.

WAA MAXAY KA-JOOJINTA DEGDEGGA AH?

Ka-joojinta degdegga ah waxay keliya oo ay dhacdaa haddii ardaygu u dhaqmo siyaabo keenaya asaaska joojinta caadiga ah, iyo in dhaqankoodu uu yahay mid Qatar weyn gelinaya caafimaadkooda, ammaankooda iyo ladnaantooda, iyo tan shaqaalaha ama tan ardayda kale.

Haddii uu maamuluhu go'aansado in ka-joojin degdeg ah ay ku habboon tahay duruufaha jira, shaqaalaha dugsi waa inay ku dhaqaaqaan isla markiiba inay ku ogaysiiyaan go'aankaas, iyo baahida inaad u waddo ilamhaaga sida ugu dhaqsaha badan oo macquulka ah.

Haddii aadan awoodin in lagula soo xiriiryo iyo/ama aadan awoodin inaad qorshe u samaysato soo-qaadidda ilmahaaga, maamulaha ayaa kuu samaynaya qorshe ilmahaaga ayadoo si fican loo ilaalinayo ilaa inta uu dhammaanayo waqtiga dugsi ama soo afmeeridda howlaha uu dugsi ogolaaday.

Waxaa muhiim ah in la xusuusto in kastoo waqtiga dugsi ka-joojinta degdegga ah ay ka duwan tahay dugsi ka-joojinta lagu sameeyey duruufaha caadiga ah, habraacu waa isku mid waana in maamuluhu hubiyaa in ilmahaagii uu helay fursadda in la dhagaysto markaasna duruufihiisa ama duruufaheeda la tixgeliyey.

ILAA INTEE LE'EG AYAA ILMAHAYGA DUGSIGA LAGA JOOJINAYAA?

Muddada wada-socota ee ugu sarraysa oo ardayga dugsi laga joojin karo halkii mar waa 5 maalmo dugsiyeed.

Intaas waxaa raaca, inaan ardayga laga joojin karin wax ka badan 15 maalmood ee sannad dugsiyeedka ayadoo uusan jirin ogolaansho qoraal ah oo laga helo Agaasimaha Gobolka.

MAXAAN SAMAYN KARAA HADDII AANAN HUBIN HADDII DHAQANKA ILMAHAYGU AYSAN MUDNAYN DUGSI KA-JOOJIN?

Dugsi kasta waxaa looga baahan yahay inuu leeyahay Nadaamka Howlgelinta Ardayda kaas oo dhigaya rajooyinka bulshada ee laga wada-qabo qaybaha howlgelinta ardayda, dhaqanka ixtiraamka leh, imaanshaha iyo falalka oo ah bar laga jaan-qaato sida uu dugsiyagu wax uga qabanayo duruufaha ardayga ee gaarka ah.

Waxaa kaloo laga yaabaa inaad jeceshahay inaad weydiisato koobiga Nadaamka Howlgelinta Ardayda (*Student Engagement Policy*) ama waxaad ka eegi kartaa

website-kooda si aad u hesho. Qorshahaasi wuxuu qori doonaa rajooyinka dhaqaneed ee ka jira dugsiiga wuxuuna yahay bar tilmaameed waxtar badan si loo ogaado bal in rajooyinkaas la jebiyey.

www.education.vic.gov.au/school/principals/participation/Pages/engagepol.aspx

Dugsi ka-joojintu waa tallaabo anshaxeed oo daran waxaana loo haystaa dhacdooyinka markii tallaabooyinka kale aysan keenin wax natiijo ah oo lagu qanci karo.

Ilmahaaga waa laga joojin karaa dugsi haddii, isla markii uu dugsi imaanayo ama uu u soo socdo ama ka soo socdo ama markuu ka qaybgalayo howlaha dugsi oo dugsi ka baxsan (ay ka midka yihiin u soo socodka ama ka soo socodka howlaha dugsi), inuu –

- U-dhaqmo sidii inuu qatar uu keenayo, ha ahaato mid dhab ah, ama mid la malaynayo, caafimadka, ammaanka ama ladnaanta cid kasta;
- keenayo waxyeello weyn ama burburka alaabta ;
- Isku dayo inuu galo ama si ogaal ah uga qaybgalo xadidda alaabta ;
- Yeesho, adeegsado ama iibsho ama si ula kac ah ugu caawiyo qof kale inuu yeesho, adeegsado ama iibsho walxo sharci darro ah ama hub ah.
- Uu ku fashilmo inuu ku dhaqmo tilmaamid qeexan oo macquul ah ee xubin shaqaale si uu ugu keeno qatar, ha ahaato mid dhab ah, ama mid la malaynayo ama mid lagu gooyey, caafimadka, ammaanka ama ladnaanta qof kasta;
- Inuu si joogto ah ugu jiro dhaqan uu ku caayayo, yasayo, hoos-u-dhigo ama ku dulleynayo qof kale asagoo ku salaynaya da'da, naas-nuujinta; jinsiga; asalnimada; kala-dhantaalanka; howl shaqo-joojinta; howl galmo sharci ah; xaalladda guur; xaalladda waalidnimo; astaamaha jidheed; ictiqaadka siyaasadeed ama howleed; uurka; cunsurka; ictiqaadka diimeed ama howled; nooca galmada; xiriirka qofka (ha ahaado qaraabo ama wax kale) la leeyahay qof kale kaas oo lagu aqoonsado tixraac mid ka mid ah astaamaha kore.
- Inuu si joogto ah ugu dhaqmo dhaqan aan waxba tarayn taas oo soo dhexgasha ladnaanta, ammaanka ama fursadaha waxbarashada ee arday kasta.

Waa masuuliyadda maamulaha si loo go'aansado bal in dugsi laga joojiyo ardayga duruuf kasta oo jirta. Haddii aad wax dareen qabto oo ku saabsan habka dugsi ka-joojinta ama aqlaaqda ilmahaaga, waxaa lagugu dhiirigelinayaa inaad la xiriirto maamulaha si aad ugula hadasho ilmahaaga, cabashooyinkaaga, iyo sababaha iyo asaaska dugsi ka-joojinta.

Waxaa muhiim ah in la xusuusto inaad codsan karto kulan aad la yeelato maamulaha mar kasta inta lagu jiro muddada dugsi ka-joojinta, xataa haddii dugsi ka-joojinta mar hore la hirgeliyey.

Haddii aadan ku qanacsanayn in cabashadaada wax laga qabtay, waxaad la xiriiri kartaa Sarkaalka

Xiriirka Bulshada oo laga helo xafiiska gobolka ee wasaaradda ama mid ka mid ah adeegyada kale ee taageerada kuwaas oo ku liis-garaysan dhammaadka dokumantigan.

WAA MAXAY DUGSI KA-JOOJINTA DUGSIGA DHEXDIISA AH? MAXAY MACNO U SAMAYNAYSAA ILMAHAYGA?

Dugsi ka-joojinta dugsi dhexdiisa ah macnaheedu waa in ardaygu joogo dugsi dhexdiisa asagoo la muraaqabaynayo hase ahaatee aan fasalka dhiganayn. Taasna waxaa ka mid ah:

- Ku-daridda ardayga macalin waayo-arag ah maalintaas ama xubin shaqaale ah oo ku habboon wuxuuna macalinka u raacayaa fasallada
- Ka-qaybgelid shaqo ka socota Dugsi ka-joojinta dugsi dhexdiisa ah (tus. Dibadda ka soo shaqaynta ama diyaarinta qalabka waxbarashada).
- Siinta qol ama meel loogu talagalay halkaas oo ardaydu ku dhammaystaan dugsi ka-joojinta dugsi dhexdiisa ah ayadoo la muraaqabaynayo.

Waxay kaloo qaadan kartaa qaab kale hadba ayadoo ku xiran dugsi iyo duruufaha jira.

Waxaa muhiim ah in la xusuusto inkastoo ka-joojintan ka duwan tahay dugsi ka-joojintii hore ee 'dugsi dibadiisa' ahayd, haddana habraaca labaduba waa isku mid waana inaad heshaa ogaysiin iyo dokumantiyo isku mid ah.

WAA MAXAY MACLUUMAADKA AY TAHAY IN DUGSIGU I-SIIYO MARKII ILMAHAYGA DUGSIGA LAGA JOOJINAYO?

Markii maamuluhu go'aansado in dugsi ka-joojintu ku habboon tahay, dugsi waa inuu ku siiyaa adiga iyo ilmahaaga dokumantiyada soo socda:

- *Ogaysiinta Dugsi Ka-joojinta iyo*
- Baroosharkan

Maamuluhu waa inuu kaloo ku siiyaa macluumaadka soo socda:

- Sababaha dugsi ka-joojinta keenay
- Maalmaha dugsi kuwaas oo dugsi ka-joojintu dhici doonto
- Halka dugsi ka-joojinta ka dhici doonto (tus. Barxadda dugsi ama meel kale)
- Faahfaahinta xiriirada adeegyada taageerada dheeraadka ah ee adiga iyo ilmahaaga hadba sida ku habboon
- Qorshaha loo sameeyey siinta shaqo-guriga dugsi oo ku habboon ilmahaaga inta lagu jiro muddada dugsi ka-joojinta.

Qoraalo:

- (1) Haddii ilmahaaga laga joojiyo 3 maalmood ama wax ka yar, waa in maamuluhu hubiyaa in ardayga la siiyey shaqo macno leh si uu u soo dhammaystiro intuu ka maqan yahay dugsiga.
- (2) Haddii ilmahaaga laga joojiyo wax ka badan 3 maalmood, waa in maamuluhu hubiyaa in la siiyey *Qorshaha Waxbarashada Maqnaanshaha Ardayga iyo Qorshaha Dugsi ku-soo-noqoshada*.

MAXUU QABAN DOONAA ILMAHAYGU MARKA DUGSIGA LAGA JOOJIYO? DUGSIGA MA SIINAYAA SHAQO-GURI?

Waxaa la filayaa wixii dugsi ka-joojin ah oo ku siman saddex maalmood ama ka yar, in ardayga la siiyo shaqo-guri macno leh oo uu soo dhammeeyo. Haddii ardayga dugsiga laga joojiyo saddex maalmood iyo ka badan, waxaa la filayaa in Qorshaha Maqnaanshaha Ardayga iyo Qorshaha Dugsi Ku-soo-noqoshada in la sameeyo. Shaxda qorsheyaashaas waxaa laga heli karaa:

www.education.vic.gov.au/school/principals/participation/Pages/resources.aspx

MAXAA DHACAYA DHAMMAADKA DUGSI KA-JOOJINTA?

Isla markii ay dhammaato muddadii dugsi ka-joojintu, ilmahaaga waa in lagu taageeraa inuu dugsiga ku soo noqdo.

Haddii ilmahaaga dugsiga laga joojiyey muddo saddex maalmood dugsiyeed iyo ka badan, waxaa lagu talinayaa in loo qabto kulanka dugsi ka-joojinta ka-dib Kooxda Taageerada Ardayga, dugsiga, adiga iyo ilmahaaga. Waxaad kaloo codsan kartaa in la qabto kulanka Kooxda Taageerada Ardayga haddii aad dareensan tahay in ilmahaagu u baahan yahay taageero dheeraad ah markuu dugsiga ku noqonayo ama laga hadlo wixii arin dhaqan ah oo horseeday shilkaas keenay dugsi ka-joojinta.

Ujeeddada kulanku waa in la helo fursad looga wada hadlo waxyaalaha soo socda:

- *Qorshaha Waxbarashada Maqnaanshaha Ardayga* iyo shaqo-guriga dugsiga oo la soo dhammaystirayo muddada lagu jiro dugsi ka-joojinta.
- Xeeladaha la horumarinayo inta dugsiga la joogo ama laga maqan yahay si loo kaafiyo baahiyaha waxbarasho, bulshadeed iyo caadifadeed ee ilmahaaga.
- Masuuliyadaha la kala leeyahay ee adiga, ilmahaaga, shaqaalaha dugsiga iyo xirfad-yaqaanada kale ee taageeraya xeeladahaas.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee kulannada Kooxda Taageerada Ardayga ka eeg

www.education.vic.gov.au/school/principals/spag/participation/Pages/supportgroups.aspx

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan wixii taageerooyin ah oo laga heli karo dugsiga ka eeg Taageerada iyo Istaraatiijada ay dugsiyadu heli karaan (*Strategies and Supports Available to Schools*)

www.education.vic.gov.au/school/principals/participation/Pages/interventions.aspx

RACFAAN MA KA QAADAN KARAA DUGSI KA-JOOJINTA?

Ma jiro hab loo raaco racfaan ka qaadashada dugsi ka-joojinta.

Haddii aad qabto wax cabashooyin ah oo ku saabsan dugsi ka-joojinta ilmahaaga, waa inaad si degdeg ah ugala hadashaa cabashooyinkaaga maamulaha dugsiga.

Haddii aad u malaynayso inaan cabashooyinkaagii aanu si fiican wax uga qaban maamulaha dugsigu, waxaad la xiriiri kartaa Sarkaalka Xiriirka Bulshada oo laga helo xafiiska gobolka ee degaankaaga.

Haddii aad weli u malaynayso inaan cabashooyinkaagii aanu si fiican wax uga qaban xafiiska gobolku, waxaad warqad u qoran kartaa Agaasimaha Gobolka ama Ku-xigeenka Xoghayaha, Kooxda Taageerada Gobolka si aad ugu gudbisno cabasho rasmi ah.

Wixii acluumaad dheeraad ah, lambarada taleefanada iyo faahfaahinaha kale ee dheeraadka ah oo la xiriira cabashooyinka Waalidka waxaa laga heli karaa website-ka DEECD oo ah

www.education.vic.gov.au/about/contact/parentcomplaint.htm

YAAN KALA XIRIIRI KARAA WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH?

Habraacyada dugsi ka-joojinta iyo dugsi ka-eryidda waxay ku faahfaahsan yihiin Tilmaaha Tusaha Ku darida iyo Hawlgelinta Ardeyga (Student Engagement and Inclusion Guidance) kuwaas oo laga heli karo ayadoo laga eego:

www.education.vic.gov.au/school/principals/participation/Pages/studengage.aspx

FAQs loogu talagalay Waalidiinta oo ku saabsan dugsi ka-joojinta ama ka-eryidda waxaa laga helaa:

www.education.vic.gov.au/school/parents/behaviour/Pages/faqs.aspx

Haddii aad u baahato macluumaad dheeraad ah iyo taageero, waa inaad la xiriirtaa Sarkaalka Xiriirka Bulshada oo laga helo xafiiska gobolka ee degaankaaga (faahfaahinta xiriirada ka eeg bogga soo socda).

XAFIISYO GOBOLEEDKA WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TARBIYADA CARRUURNIMADA HORE

NORTH EASTERN VICTORIA REGION

Email: nevr@edumail.vic.gov.au

Benalla

Boostada: PO Box 403, Benalla, Victoria 3672

Meesha: 150 Bridge Street East, Benalla,
Victoria 3672

Taleefanka: (03) 5761 2100

Fakiska: (03) 5762 5039

Glen Waverley

Meesha: Level 3, 295 Springvale Road,
Glen Waverley 3150, Victoria

Taleefanka: (03) 9265 2400

Fakiska: (03) 9265 2444

NORTH WESTERN VICTORIA REGION

Email: nwvr@edumail.vic.gov.au

Bendigo

Boostada: PO Box 442, Bendigo, Victoria 3552

Meesha: 7-15 McLaren Street, Bendigo,
Victoria 3550

Taleefanka: (03) 5440 3111

Fakiska: (03) 5442 5321

Coburg

Boostada: Locked Bag 2001, Coburg, VIC 3058

Meesha: Level 2, 189 Urquhart Street,
Coburg, VIC 3058

Taleefanka: (03) 9488 9488

Fakiska: (03) 9488 9400

SOUTH EASTERN VICTORIA REGION

Email: sevr@edumail.vic.gov.au

Dandenong

Boostada: PO Box 5, Dandenong 3175

Meesha: 165-169 Thomas Street, Dandenong 3175

Taleefanka: (03) 8765 5600

Fakiska: (03) 8765 5666

Moe

Boostada: PO Box 381, Moe, Victoria 3825

Meesha: Corner Kirk and Haigh Streets,
Moe, Victoria 3825

Taleefanka: (03) 5127 0400

Fakiska: (03) 5126 1933

SOUTH WESTERN VICTORIA REGION

Email: swvr@edumail.vic.gov.au

Ballarat

Meesha: 109 Armstrong Street North, Ballarat, 3350

Taleefanka: (03) 5337 8444

Fakiska: (03) 5333 2135

West Footscray

Meesha: Level 3, Whitten Oval, 417 Barkly Street,
West Footscray, 3012

*(waxaa laga soo galaa albaabada dhalada
ah oo is-fura)*

Taleefanka: (03) 9291 6500

Fakiska: (03) 9291 6565

Geelong

Boostada: PO Box 2086, Geelong, Victoria 3220

Meesha: 5A Little Ryrie Street, Geelong, Victoria 3220

Taleefanka: (03) 5225 1000

Fakiska: (03) 5225 1099

TAAGEERADA LA HELI KARO OO DHEERAAD AH

Khadka taleefanka waalidka Victoria

Taleefanka: 13 22 89 - 8am to midnight 7 days a week

Parentline waxay adeegga la-talinta taleefanka ah siisaa Waalidiinta iyo daryeelayaasha haya carruurta da'doodu u dhaxayso dhalashada ilaa sided-iyto-ban sannadood.

Waalidiinta Victoria

Taleefanka: (03) 9380 2158 or 1800 032 023
(soo wacayaasha baadiyaha kaliya)

Website-ka: www.parentsvictoria.asn.au

Victorian Aboriginal Education Association Inc.

Taleefanka: (03) 9416 3833

Website-ka: www.vaeai.org.au

Child and Adolescent Mental Health Services

Taleefanka: 1300 767 299

Website-ka: www.health.vic.gov.au/mentalhealth/services/child/

Children's Protection Society

Taleefanka: (03) 9450 0900

Website-ka: www.cps.org.au

Australian Childhood Foundation

Taleefanka: (03) 9874 3922

Website-ka: www.childhood.org.au/website/default.asp

Association of School Councils in Victoria

Taleefanka: (03) 9808 2499

Website-ka: www.asciv.org.au/ASCIV/Welcome.html

Victorian Council of School Organisations

Taleefanka: (03) 9429 5900

Website-ka: www.viccco.org.au/

Victorian Multicultural Commission

Taleefanka: (03) 9208 3184

Website-ka: www.multicultural.vic.gov.au/